

Lambarka Taxanaha **801.12AR** La-qaatay **Noofeembar 2023** Dib Loo Eegay **November 2025**

Cinwaanka **Helitaanka Luqadda**

1. Turjumaad Afka ah iyo Mid Qoraal ah

Xidhiidh tayo leh oo joogto ah oo ka dhexeeya qoysaska iyo shaqaalaha dugsiga ayaa muhiim u ah taageeridda waxbarashada ardayga. Degmada iyo dugsiyadeeda ayaa qaadi doona tallaabooyin loogu talagalay in lagu hubiyo xidhiidh macno leh ee lala yeesho waalidiinta/masuuliyiinta leh aqoonta luqadda Ingiriisiga xaddidan, oo ay ku jirto ogeysiin ku filan waalidiinta/masuuliyiinta barnaamij kasta, adeeg ama waxqabad kasta oo loogu yeedho dareenka waalidiinta/masuuliyiinta aqoonta u leh luqadda Ingiriisiga. Tallaabooyinka waxa kujira kuwan soo socda:

- 1.1 Nidaamyada, xeerarka iyo siyaasaddaha sida badan loo isticmaalo iyo agabyada kale ee muhiimka ah waxaa loo turjumi doonaa af-isbaanishka iyo Af-soomaaliga waxaana laga dhigi doonaa mid laga heli karo wabsaaydada dugsiga iyo degmada.
- 1.2 Taleefanka, iimaylka iyo fariimaha wabsaaydka ee muhiimka ah ayaa loo turjumi doonaa Af-sbaanishka iyo Af-soomaaliga.
- 1.3 Macluumaadka muhiimka ah ee gaarka u ah ardayga, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn warbixinnada horumarka, foomamka oggolaanshaha, foomamka diiwaangelinta, iyo dhukumentiyada anshaxmarinta ayaa hadal ahaan loo tarjumi doonaa ama lagu turjumi doonaa qoraal ahaan luqadda aasaasiga ah ee waalidka/masuulka ardayga haddii loo baahdo si loo hubiyo xidhiidhyo macno leh. Ardeyda hesha adeegyada waxbarashada gaarka ah, Ogeysiiska Ilaalinta Nidaamka iyo dhammaan Ogeysiisyada Hore ee Qoraalka ah waxaa loo turjumi doonaa hab qoraal ah haddii aysan suurtagal ahayn in sidaas la sameeyo.
- 1.4 Helitaanka adeegga turjumaanka ee taleefoonka ee la ansixiyay ee tarjumaadda afka ayaa la heli doonaa iyadoo la dalbanayo dhammaan waalidiinta/masuuliyiinta u baahan inay helaan si loo hubiyo wada xidhiidhka waqtigiisa iyo waxa macnaha u samaynayaba.
- 1.5 Waalidiinta/masuuliyiinta leh aqoonta luqadda Ingiriisiga xaddidan waxay heli doonaa qof ahaan turjumaan u qalma, adeegga turjumaadda taleefanka ee la oggolaaday ama adeegga turjumaada muuqaalka ah ee la ansixiyay marka ay lagama maarmaan noqoto in afka lagala hadlo macluumaadka gaarka ah ee ardayga (tusaale, shirarka waalidka) ama marka la eego codsiga waalidka/masuulka. Dugsigu kuma xidhnaan doono turjumaanadda aan aqoonta fiican lahayn.

2. Aqoonsiga iyo Ogaysiiska

Waalidiinta/masuuliyiinta u baahan adeegyada luqadda waa la aqoonsan doonaa oo waa la ogeysiin doonaa adeegyada luqadda ee ay heli karaan. Dugsiyadu waxay ilaalin doonaan macluumaadka ku saabsan baahida luqadda waalidka/masuulka ee nidaamka macluumaadka ardayda degmada 196.

Boodhadhku waxa ay yaalaan albaabka laga soo galo dhamaan dhismayaasha dugsiga si loo ogeysiyo waalidiinta/masuulka aan Ingiriisiga ku hadlin agabka la heli karo ee luuqada, oo ay ku jirto xaqa ay u leeyihiin in ay codsadaan turjumaan bilaash ah.

3. Qorshaha Helitaanka Luqadda

Guddiga dugsiga waxa uu qaatay qorshe ku aadan helitaanka luuqadda oo qeexaya hannaanka iyo habraacyada degmada ay caawimo luuqadeed oo wax ku ool ah ku siinayso ardayda iyo dadka waaweyn ee ku hadla luuqad aan ahayn Ingiriisiga.

- 3.1 Qorshaha Helitaanka Luqadda waxaa ka mid ah sida degmada iyo iskuuladu ay u adeegsan doonaan luqadda dhegoolaha aqoonta u leh isgaarsiinta laxiriirta natiijooyinka tacliinta, horumarka, iyo meelaynta ardayda barnaamijyada gaarka ah iyo adeegyada.

- 3.2 Qorshaha Helitaanka Luqadda wuxuu qeexaa sida qoysaska iyo bulshooyinka loogu wargelin doono xuquuqdooda hoos timaada qorshahan. Qorshaha waxay dadweynuhu ka heli karaan webseedka Degmada 196 waxaana soo koobis lagu daray buug-yaraha Dulmarka Xuquuqaha iyo Waajibaadka Ardayga ee sanadlaha ah, oo uu la socdo liinkiga qorshaha dhammeystiran.
- 3.3 Guddiga dugsiga waxay dib-u-eegis ku samayn doonaan qorshaha helitaanka luqadda labadii sanaba mar waxayna cusboonaysiin doonaan qorshaha sida ku habboon.
- 3.4 Qorshaha helitaanka luqadda ayaa ay heli karaan shaqaalaha, shaqaaluhuna waxa ay masuul ka noqon doonaan u hoggaansanaanta qorshaha.

4. Nidaamka Cabashada

Cabashada ku saabsan diidmada adeegyada helitaanka luqadda, ama tayada adeegyada la bixiyo, waxa lagu samayn karaa shaqsi ahaan, iimaylkan in lagu diro languageservices@district196.org ama loo diro ISD 196 Xafiiska Degmada, Waaxda Xidhiidhka 3455 153rd St. W., Rosemount, MN 55068.

References:

- Minnesota Statute 122A.31, American Sign Language/English Interpreters.
- Minnesota Statute 123B.32, Language Access Plan
- District 196 Language Access Plan